



Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta qaaliga ahow,

Febraayo 4, 2022

Dugsiyada Dadweynaha ee Springfield waxay iskaashi la sameeyeen ururka aan faa'iido doonka ahayn oo la yidhahdo EducationSuperHighway ee hindise wacyigelin ah si ay kuu ogeysiyaan **barnaamijka isku xidhka la awoodi karo (ACP)**. Barnaamijkan dawladda dhexe waxa uu bixiyaa:

- Ilaa \$30 bishii sida **qiimo dhimista adeegga internetka ah** iyo
- Hal mar, ilaa \$100 qiimo dhimis ah qalabka ku xiran (sida laptop-ka, kombayutarka, ama tablet-ka) oo lagu soo gatay bixiye ka qaybqaadanaya.

Helitaanka intarneedku waxa uu noqday qayb muhiim ah oo ka mid ah ka-qaybgalka buuxa ee dugsiya, waxana aanu rabnaa in aanu hubinno in ardaygaagu uu heli karo guriga oo la isku halayn karo oo la awoodi karo. intu u ardaygaagu dhigto dugsi ku yaala Dugsiyada Dadweynaha Springfield inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2021-2022, **qoyskaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu helo dheefaha barnaamijka ACP**. Dugsiyada Dadweynaha ee Springfield waxay ka qaybqaataan bixinta u-qalmitaanka bulshada ee dawlada dhexe (CEP) taasoo si toos ah kuugu dhigaysa inaad xaq u yeelato.

Haddii aad xiisaynayso inaad codsato faa'iidadan waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo waxaad ka dalban kartaa onlayn [ACPbenefit.org](http://ACPbenefit.org). Intaa waxaa dheer, waxaad la xiriiri kartaa xarunta PACE inta u dhaxaysa saacadaha 8 subaxnimo iyo 4 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha 413-787-6959 ama la xiriir bahwadaagtayada EducationSuperHighway adigoo isticmaalaya foomka xiriirka: [educationsuperhighway.org/acpbenefit](http://educationsuperhighway.org/acpbenefit) si aad u codsato.

**Kaarka warbixinta ee ardaygaaga waa la soo gelin karaa inta lagu jiro nidaamka codsiga si loo caddeeyo u-qalmitaankaada faa'iidada Barnaamijka Isku-xidhka La-awoodo.**

Waad ku mahadsan tahay taageeradaada joogtada ah ee Dugsiyada Dadweynaha ee Springfield waxaan halkan u joognaa inaan kaa taageerno wax ku saabsan faa'iidada ACP iyo waliba walaac kasta oo aad qabto.